Public Health
Seattle & King County

# Su'aalo loogu talagalay Mulkiilayaasha

Fadlan isticmaal su'aalahaan si aad u aruurisid macluumaadka aad u baahantahay markii qof loo shaqaaleynayo ka shaqeynta nidaamkaaga biyaha wasakheysan. Qeybta af Ingiriiskaa ee dhokumentigaan, sii dadkaad dooneyso inaad shaqaaleyso si markaas ay u fahmaan su'aalaha aad tixraaceyso.
Waxaan ku talinaa in lala xiriiro ugu yaraan saddex xirfadleyda biyaha wasakhda intaan la go'aansan cid la shaqaaleeyo. Waxaad sidookale la soo xiriiri kartaa xaafiiskeena hadaad su'aalo dheeraada qabtid.

## Naqshadeeyaha ama Injineerka Xirfadda u leh Nidaamka Sifeynta Biyaha Wasakheysan ee Goobta (Beereed, Madani ama Nadaafad)

Naqshadee nidaamyo biyaha wasakhdaa oo cusub oo beddel ah, soo gudbi arjiyo loogu talagalay qeybaha hoose iyo hagaajinta khadka seeraha, la samee rakibe kulamo dhisidda ka horreeya, soo gudbi arjiyo loogu talagaly arjiyada isha biyaha iyo sawirrada/jaantusyada diiwaanka, samee baaritaannada rakibidda nidaamka biyaha wasakheysan, oo samee daraasado suurtogalnimo.

---

1. **Waa maxay qiimaha kuwa soo socda? (adeegyadaan qaarkood hal khidmad bey ku jiri karaan):**
    a. Qiimeynta hordhacaa ee goobta
    b. Dhul-qodista lagu ogaado nooca ciida iyo biyaha
    c. Naqshadda
    d. Baaritaanka tuubooyinka baxa
    e. Tijaabada cadaadiska
    f. Baaritaanka rakibista
    g. Baaritaanka gadaal-buuxinta (backfill inspection)
    h. Baakad dhis (As-built package)

2. **Tan ma ku jirtaa lacagaha County'ga** (county = dowlad-deegaanka)

3. **Shirkaddiina wax ma ka caawisaa diiwaangelinta Ogeysiiska shahaadada?**

    *Ogeysiiska Shahaadada waa warqad mulkiiluhu ku qiro in hantidu leedahay nidaam biyaha wasakheysan oo uu masuul ka yahay hawlfulinta iyo dayactirka nidaamkaas.

4. **Lacag dheeraad ah ma ku dallacdaa buug-tusmeedka mulkiilaha guriga?**

5. **Lacag ma ku dallacdaa booqashooyin ama la-talin dheeraad ah?**

6. **Sidee ugu dhaqso badan baa u gudbisaa jaantuska ugu dambeeya ee diiwaanka kadib markii la rakibo nidaamka biyaha wasakheysan?**

7. **Waa maxay waqtiga ugu dambeeya ee aad kasoo jawaabto wicitaannada ama iimeellada?**

**Rakibayaasha Nidaamka Ruqsad/shahaado u haysta** (Certified Master Installers)
Rakib nidaamyo biyaha wasakhdaa oo cusub oo beddel ah

---

1. **Waa maxay qiimaha lagu rakibo?**
    a. Tan ma waxaa ku jirta shaqo koronto?
    b. Tan ma waxaa ku jirta lacagaha County'ga?
    c. Tan ma waxaa ku jirta baaritaanka ugu dambeeya?
    d. Tan ma waxaa ku jirta xammaalka gadaal-buuxinta iyo alaabaha?

2. **Muddo intee le'eg baa gorgortanku jirayaa, maxaana la socda?**

3. **Taangiyada, biyo ma ka buuxisaa kadib rakibista?**

4. **Shirkaddiinu ma bixisaa adeegyada ilaalinta? Haddaysan sameyn, yaad ku talisaa?**

5. **Shirkaddiinu ma isku daydaa inay mudnaan-siiso nidaamyada cimilada u nugul?**

6. **Waa maxay jadwalkiina rakibista qiyaas ahaan laga bilaabo waqtiga aad heshaan oggolaanshaha?**

7. **Shirkaddiinu gacan ma ka geysataa Ogeysiiska Shahaadada oo u baahan in la diiwaangeliyo?**

    (Ogeysiiska Shahaadada waa warqad mulkiiluhu ku qiro in hantidu leedahay nidaam biyaha wasakheysan oo uu masuul ka yahay hawlfulinta iyo dayactirka nidaamkaas.)

8. **Ma dammaanad qaadaa shaqadaada? Waa maxay muddada dammaanaddaada? Ma dhameystiri doontaa hagaajin haddii dhib jiro?**

9. **Waa kuma rakibahaaga shahaadada u haysta nidaamka oo goobta ugu sugnaan doona kormeerista rakibidda nidaamka biyaha wasakheysan?**

10. **Waa maxay waqtiga ugu dambeeya ee aad kasoo jawaabto wicitaannada ama iimeellada**

**TALO:** Wixii hagaajin ah, waxaa habboon rakibuhu inuu baaro hantida oo ogaado sababta cilladda KAHOR soo-jeedin kasta.

## Dayactireyaasha Shahaadada u haysta Nidaamka Bullaacada Goobta

Baar oo dayactir nidaamyada wasakhda oo samee hagaajinno xadidan

1. **Maxaa ku jiri doona baaritaanka Dayactiraha Nidaamka Bullaacadda Goobta ({OSM}, tusaale, fiirinta tuubooyinka iyo daadashada/difqidda, filtarrada nadiifinta, sugnaanta qaab-dhismeed, koontaroollada biyaha dhulka gala, iwm)?**
2. **Xaadir ma u ahaan karaa baaritaanka? (Waxaan ku talinaa inaad la socota shaqada dayactiruhu qabto oo wax badan ka ogaato sida nidaamkaaga biyaha wasakheysan u shaqeynayo.)**
3. **Lacag dheeraad ma ku dallacdaa aaburrada xabaalan inaad hesho/furto?**
4. **Waa maxay faaiidooyinka in kiciyeyaasha sagxadda lagu rakibo (haddii loo baahdo)?**
5. **Ma bixisaan wax qiimo-dhimis ah (tusaale, waayeelka, macaamiil cusub, iwm.)?**
6. **Qarashka baaritaanka ma ku jiraa lacagaha County'ga?**
7. **Goormaa warbixinta la gelin doonaa khadka RME si loo fiiriyo?**
8. **Haddii hagaajin loo baahdo, ma sameyn kartaa hagaajinta? Hagaajin koronto ma sameysaa, ama ma la shaqeysaa korontiiste?**

**TALO:** Haddii dayactire/ilaaliye helo cillad la xiriirta nidaamka biyaha wasakhdaa, waxaad u baahan doontaa inaad cilladdaas hagaajiso. Waxaad shaqaaleyn kartaa cidkasta oo ruqsad u haysata nooca shaqada loo baahanyahay. Waxaad ka heli kartaa liiska xirfadleyda ruqsadda haysta www.kingcounty.gov/oss/professionals(boggaan khad wuxuu ku qoran yahay Ingiriis keliya).

## Diinimada/Qaadayaasha Biyaha Wasakhdaa:

Ka saar wasakhda taangiyada oo u dir dhismaha sifeynta biyaha wasakhdaa

1. **Waa maxay qiimaha wasakh saarista? Maxaa la socda wasakh saarista?**
2. **Haddii taangiga biyaha wasakhda ah uu ka weynyahay 1,000 galaan, ma qarash dheeraada baa raaci doona?**
3. **Ma bixisaan wax qiimo-dhimis ah (tusaale, waayeelka, macaamiil cusub, iwm.)?**
4. **Goormaa warbixinta la gelin doonaa khadka RME?**
5. **Qarashkaan ma ku jiraa qodista si loo helo/furo aaburka (aaburrada) taangiga wasakhda? Haddaysan ku jirin, meeqaa ku dallacdaa qodista:**
    a. 1 aaburka taangiga biyaha wasakheysan
    b. 2 aaburrada taangiga biyaha wasakheysan
    c. Aaburka taangiga Wasakh-saarista- hadii taangi wasakh-saare ah jiro, waa in asagana wasakhda laga saaro sida taangiga biyaha wasakhehysan, tuubo lagu biyoraacsho, oo diinimo lagu qallajiyo. Haddii taangiga wasakh-saaraha ah uu buuxo, waxaa dhici karta lacag dheeraad ah in laguugu dallaco.
6. **Qarashkaan ma ku jiraa lacagaha qashin-qubka iyo County'ga?**
7. **Qarashkaan ma ku jiraa baaritaanka tuubooyinka gudaha soo gala iyo kuwa ka baxa ee taangiga biyaha wasakhdaa? Lacag dheeraada ma ku dallacdaa in la nadiifiyo tuubada shaandheynta/filtarka?**
8. **Ma lacag dheeraada baa lagu dallacaa biyaha saa'idkaa iyo waqtiga loo baahanyahay in lagu wasakh-saaro taangi ay ku jirto caddad aan caadi ahayn ee xumbo ama dhooqo?**

**TALO**: U sheeg wasakh-saaraha cabbirka, nooca, marinka aaburrada, da'da guriga, iyo markii ugu dambeysay ee nidaamka wasakhda laga saaray. Hadday jirto masaafo dheer in wasakhda la soo nuugo ama wasakh-saaristu u baahan doonto dalcad foorar ah, Wasakh-saaraha u sheeg dheerarka masaafada iyo taagga. Wasakh-saaruhu wuxuu go'aansan doonaa in taraaggu adeegga noocaan ah qaban karo iyo inkale.

**Ku-xir/wadaag boggeena www.kingcounty.gov/oss/professionals (boggaan khad wuxuu ku qoran yahay Ingiriis keliya)**